



Tallaado, Sebtambar 8: Koronto La'aan iyo Maqnaansho

Qoysaska iyo Shaqaalaha PPS ee Qaaliga ah,

Iyada oo ay jirto koronto la'aan baahsan kana dhacday magaalada Portland iyo hareeraheeda, haddaba waxa aynu ka warqabnaa in tiro badan oo arday iyo shaqaale ah guryahoodii ay korontadii ka go'day, taasina waxa ay sababtay inay ka qeybqaadan kari waayaan fasaladii waxbarashada ee guryaha lagu qaadanayey maanta. Ardayda soo gali kari weyday koronto la'aanta awgeed maanta oo Tallaado ah laguma ganaaxi doono maqnaanshahooda.

Ardayda qaarkood ee fursad u helay inay soo galaan casharadii fasalada lagu qaadanayey waxaa dhacday inay la kulmeen inay macallimiintii fasalkii ay ka maqnaanyeen. Taasi macnheedu waxa weeye in macallimiintii ay korontadu ka go'day guryahooda ay ka soo bixin lahaayeen casharada oo iyaguba soo gali kari waayey. Qoysasku ardaydu waa inay war ka helaan iskuulada ardaydooda arrimahan dhacay ee koronto la'aanta ah.

Ugu dambeyntii, waxaa jira dhowr iskuul oo ka mid ah Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) oo ay korontadu ka maqan tahay iyo/ama wifi waqtigani xaadirka ah. Macallimiinta iyo shaqaalaha uma suurtagaleyso inay soo galaan dhismayaasha ilaa ay korontadu soo noqoneyso. Fadlan waxaad la xiriirtaa maamulka dhismaha iskuulkaaga sidii uu u hubin lahaa inay koronto jirto dhismahaaga haddii aad qorsheyneysay inaad gasho dhismahaasi.

Waad mahadsan tiihin.